

1**NOOCYADA DAGGANAASHADA**

Waxaad dagganaha siin kartaa kirada, taasoo caadi ahaan socota muddo hal sanno, ama heshiiska dagganaasho la soo afjari karo waqti kasta oo laga sheego afka ama la soo qoro, taasoo socota muddo bil ilaa bil. Heshiiska dagganaashada la soo afjari karo markii la rabo wuxuu ku siiyaa dabacsanaan, balse kirada waxay ku siisaa sekurity badan.

2**WAXYAABAH AASAASIGA EE LA ADEEGSADO**

Guri kasta oo la kireesto waa in uu leeyahay kariye iyo forno, dariishad kasta waa in ay leedahay shabaq ilaa inta ka hooseyso dabaqa shanaad, iyo quful shaqeyya oo lagu suro dhamaan dariishadaha iyo albaabada laga soo galo/baxo. Lagaam rabo in aad keentid qaboojiyeyaal, harka dhismooyinka ama waxyaabaha loo isticmaalo qolka dhaqidda, hase ahatee haddii aad bixisid, waa in aad dayatirtid.

3**KULEELKA IYO DANABKA**

Dagganaha waxaa laga dalban karaa oo keliya in uu bixiyo danabka haddii ay jiraan cabbiro u gaar ah adeegga la soo dallaco. Waa in aad bixisid kuleelka iyo biyaha kulul haddii adiga iyo dagganahaada aadan saxiixin heshiis qoran oo sheega in ay waajib ku tahay dagganaha in uu bixiyo.

4**BAARISTA HORE DAGGANEYAASHA**

In lagu adkeysto tixraacyada iyo caddeynta shaqada waa siyaabaha loo baaro dagganeyaasha suurtoqalka ah. Waxaad ka dalban kartaa dagganeyaasha suurtoqalka ah, kuwa aan keeni karin tixraac ama kuwa aan u muuqanin in ay leeyahiin ilo dakhli ku filan oo joogto ah in ay la yimadaan qof la-saxiixda.

5**DAMAANADDA SEKURITIGA IYO KIRADA BISHII LA SOO DHAAFAY**

Bilowga dagganaashada, sharci ahaan waxaad dagganaha ka dalban kartaa in uu horay u bixiyo kirada bishii la soo dhaafay iyo damaanadda sekuritiga oo ah xisaab aan ka badneen xisaabta kirada hal bil. Haddii aad soo aruurisid, waa in aad, taasoo ka tirsan waxyaabo kale, siisid resiido ku habboon, sannad kasta bixisid korsaar iyo marka laga hadlo damaanadda sekuritiga, in aad lacagta ku shubtid xisaab gaar oo laga furo bangi ku yaal Massachusetts. Waxaa muhiim ah in adiga aad u hoggaansantid sharuudaha adag ee [sharciga damaanadda sekuritiga](#).

6**KHIDMADAHA SHARCIGA IYO SHARCI DARRADA**

Sharci ahaan, waxaad dagganaha ku soo dallici kartaa kirada bisha kowaad iyo tan dambe, damaanadda sekuritiga, iyo khidmadda qufulka. **WAA SHARCI DARRO** in aad adiga ku soo dallacdid khidmadda haynta, khidmadda xoolaha guri joogga, ama khidmadda gedisleyga/helaha. Waxaad soo dallici kartaa khidmadda gedisleyga/helaha haddii aad tahay iibiyaha hantida shattiga haysta aadna heshiis la gashay dagganaha.

Haddii u baahan tahay kaalmo dheeraad ah,
booqo boston.gov/housingstability ama na soo wac ama email noo soo dir:
(617) 635-4200 ama housingstability@boston.gov

7**DIB-U-FATTASHIDDA GURYAHA KIRADA**

Inta badan kiisaska, milkiileyaasha hantida wuxuu sharciga ka rabaa in la fattasho guryahooda la kireeyo si loo ogaado haddii ay u hoggaansan yahiin [Xeerka Nadaafadda Gobolka \(State Sanitary Code\)](#) in yar kaddib marka dib looga kireeyo dagganeyaalka cusub.

8**KIRADA WAQTIGEEDA LAGU BIXIYO**

Ma jirto "muddo leysu dhafo" bixinta kirada. Waxaad xaq u leedahay kirada maalinta ku qoran qodobada dagganaashada. Waxaa soo dallici kartaa khidmadda soo daahidda, hase ahaatee taasi waa in ay ku qoran tahay heshiis ogolaada. Markaas kaddib xattaa, lama soo dallici karo khidmaddaan haddii kiradaan aan lala soo daahin ugu yaraan 30 maalin.

+

Haddii dagganahaada uu gadaal uga dhaco bixinta kirada ama ku adag tahay bixinta kirada, waxaa dhici karto in uu xaq u yeesho kaalmada kirada Magaalada ama Gobolka. Fadlan booqo boston.gov/rentalrelief si aad u heshid macluumaad badan.

9**DHEXDHEXAADIN**

Haddii adiga iyo milkiilaha hantidaada idin dhexmaro murrar aadan adiga xallin karin dhexdiina, waa in aad ku fakartid dhexdhexaadin. Dhexdhexaadinta waa hab aan rasmi ahayn aad adiga iyo dagganaha iskudayi kartiin in aad gaartaan xal idinka oo kaashada dhexdhexaadiye aan dhinacna la jirin.

Haddii aad u baahan tahay dhexdhexaadin, fadlan la xariir [Xafiiska Sugidda Guriyeynta \(Office of Housing Stability\)](#) telefoonka 617.635.4200 ama housingstability@boston.gov.

10**SAARIDDA**

Haddii aad dhamaysatay dhamaan talooyinka kale aadna u baahan tahay in aad saartid dagganaha, waa in aad soo afjartid dagganaashada adiga oo adeegsada ogeysiis qoran kaddibna maxkamadda ka dalbatid in laga qaad talaabo sharci. [Sharciga Ogeysiiska Sugidda Guriyeynta \(Housing Stability Notification Act\)](#) wuxuu ka rabaa milkiileyaasha hantida in ay geeyaan Ogeysiiska Xuquuqda Dagganaha iyo Ilaha (Notice of Tenants' Rights and Resources) isla marka ay geeyaan Ogeysiiska Ka Bixinta (Notice to Quit) ama Ogeysiiska Dib u Cusboneysiin La'aanta Kirada (Notice of Non-renewal of a Lease). Sharcigaan wuxuu kaloo ka rabaa milkiileyaasha hantida in ay Xafiiska Sugidda Guriyeynta (Office of Housing Stability) siiyaan koobiga Ogeysiiska Ka Bixinta (Notice to Quit) ama Ogeysiiska Dib u Cusboneysiin La'aanta Kirada, iyo Shahaadada u Hoggaansamida (Certificate of Compliance)/Adeegga. Milkiileyaalka badan ayaa waxay qortaan qareeno oo iyaga ku kaalmeeyo wax noqon kara kaali, muddo dheer qaata, iyo [hawl](#) adag. Haddii aad daggan tahay dhismo uu milkiilaha dhinac ka daggan yahay, aadna la kullantid sharuudaha kale, waxaa dhici karto in aad xaq u yeelatid kaalmo sharci oo lacag la'aan ah lagana qaato Mashruuca Qareenada Iskaa Wax u Qabso (Volunteer Lawyer Project). Fadlan la xariir (617) 603-1700 ama celhp@vlpnet.org.

***Haddii u baahan tahay kaalmo dheeraad ah,
booqo boston.gov/housingstability ama na soo wac ama email noo soo dir:
(617) 635-4200 ama housingstability@boston.gov***